Dibuhabaynta fasaxa waalidka

Lacag maalmeedka waalidka waxaa lagu samaynayaa dibuhabayn

Fasaxyada waalidka dibuhabayn ayaa lagu samaynayaa, waxaana ay saamayn ku yeelanayaan gunnooyinka Kela-da. Boggaan waxaa lagu soo uruuriyay macluumaadka ku saabsan, sida lacag maalmeedka waalidka ee Kela-da bixiso uu isbeddelku ugu dhici doono deyrta 2022.

Marka la samaynaayo dibuhabaynta waxaa la isku dayi doonaa in si siman tixgelinta loo siiyo dhammaanba xaaladaha kala duwan, xittaa qoyskaska noocyada kala duwan ah iyo sidoo kale noocyada kala duwan ee ganacsiga. Ujeedada laga leeyahay dibuhabaynta waa

- In fasaxa waalidka iyo mas'uuliyadda daryeelka loo kala qaybiyo qoyska dhexdiisa, si siman labada waalidba
- In la xoojiyo sinnaanta iyo caddaaladda nolosha shaqada
- Farqiga dhanka mushaarka ah ee u dhexeeya labada jinsi in uu yaraado.

Qaabka cusub ee fasaxa waalidka ee soo socda, qoysku waxaa ay heli doonaan waxyaabo suuraggal ah oo fara badan, in ay qaataan fasaxa waalidka oo aan xaddidneyn, islamarkaana leh kala doorasho.

Kela|Fpa

Magacyada gunnooyinka qoyska ee ay Kela-da bixiso waa ay isbeddelayaan

Haddii xilliga ilmaha loo qabtay inuu dhasho ay tahay **4.9.2022** amaba kaddib, lacago maalmeedka waalidka waxaa ay yihiin

- Lacag maalmeedka uurka
- Lacag maalmeedka uurka ee gaarka ah
- Lacag maalmeedka waalidka

Haddii xilliga ilmaha loo qabtay inuu dhasho ay tahay 4.9.2022 ama ilmaha adhabshanka ah la soo qaatay 30.7.2022 ama waqtigaas kahor, gunnooyinka kela-da waxaa ay ku salaysnaan doonaan sharciyadii hore. Sida ay sharciyadii hore dhigayaan lacag maalmeedka waalidka waxaa ay kala yihiin lacag maalmeedka hooyada, lacag maaleedka hooyada ee gaarka ah, lacag maalmeedka aabaha ama lacag maalmeedka waalidka.

Gunnooyinka qoyska waa kuwo ku xiran hadba ilmaha markaa ay khusayso. Hadii qoyska ay u dhashaan laba ilmood xilliyo isku dhow, waxaa qoyska looga noolaan karaa oo ka jiraaya laba sharci oo kala duwan.

Cadadka Go'an ee lacag maalmeedka waalidka, marka isbeddelku dhaco kaddib



Lacag maalmeedka uurka

Waalidka uurka leh waxaa uu fasaxa uurka geli karaa ugu hor-reyn 30 maalmood ama 5 toddobaad kahor xilliga loo qabtay in ilmuhu ay dhashaan. Waalidka ku jira fasaxa uurka waa uu qaadanayaa lacag maalmeedka uurka. Waxaa lacagtaas la bixinayaa 40 maalmood ama qiyaastii 6,5 toddobaad.

Dalbo lacagta maalmeedka uurka ugu dambayn 2 bilood kahor xilliga loo qabtay dhalashada ilmaha.

Kahor inta aad lacagtaas dalban, waxaad shaqo bixiyahaaga ka hubsataa in xilliga fasaxa uurka aad mushaar qaadanayso iyo inkale.

Xusuusnoow in ay shaqo bixiyahaaga ku wargeliso fasaxa uurka ugu dambayn 2 bilood kahor inta aadan bilaabin fasaxa.

Lacag maalmeedka uurka ee gaarka ah

Haddii goobta shaqada aad u nuglaato maaddada kiimikada ee kaahfalaha ah (säteilyl) amaba cudur faafa, shaqada islamarkiiba waad ka joogi kartaa, haddii aad uur leedahay. Xaaladdaas oo kale marka ay dhacdo, waxaad qaadanaysaa lacag maalmeedka uurka ee gaarka ah.

Marka ilmuhu uu dhasho kaddib fasaxa uurku wuu sii soconayaa. Waalidka uurka leh waxaa xilligaan inta lagu jiro la siin doonaa lacag maalmeedka uurka.

Sharciga ku saabsan lacag maalmeedka uurka ee gaarka ah wuxuu dhaqangalayaa 1.8.2022. Haddii aad shaqada ka tagto kahor 1.8.2022, waxaad qaadanaysaa sida sharcigii hore uu dhigaayo lacag maalmeedka hooyada ee gaarka ah. Taa macnaheedu waxaa weeye in aadan qaadanaynin lacag maalmeedka uurka ee gaarka ah, sida sharciga cusub uu dhigaayo. Si kastaba xaaladdaan oo kale waxaad qaadanaysaa lacag maalmeedka waalidka iyo uurka, sida sharciga cusub uu dhigaayo.



160+160 =
320 maalmood =
14 kk

Lacag maalmeedka waalidka

Waxaad bilaabi kartaa lacag maalmeedka waalidka, marka ilmuhu dhasho Fasaxa waalidka waxaa geli kara mid kasta oo labada waalid ah. Sidoo kale waxay fasaxa u geli karaan qaab kaltan ama door qof walba markiisa ah. Fasaxa waalidka waxaa uu soconayaa 320 maalmood oo maalmaha shaqada ah, taasoo u dhiganta qiyaastii 14 bilood. Mid walba oo labada waalid ka mid ah wuxuu maalmaha fasaxa waalidka ku leeyahay kala bar, taasoo u dhiganta 160 maalmood. Waalidku wuxuu siin karaa waalidka kale 0-63 maalmood, taasoo u dhiganta ugu badnaan 10,5 toddobaad. Kela-da waxaa ay xilliga fasaxa waalidka bixinaysaa lacag maalmeedka waalidka. Fasaxa waalidka waxaa la qaadan karaa xilliyo kala duwan, illaa iyo inta ilmaha yar uu ka buuxi-naayo da'da 2 sano. Si kastaba waa inaad shaqa bixiyahaaga kala heshiisaa qaadashada fasaxa waalidka.

Haddii qoyska ay mataano u dhashaan, Kela-da waxaa ay lacag maalmeedka waalidka bixinaysaa 84 maalmood oo maalmaha shaqada ah taasoo u dhiganta qiyaastii 14 toddobaad oo dheeraad ah.

Haddii waalidku uu kaligiis daryeelo ilmaha, waxaa uu isticmaali karaa dhammaan 320-ka maalmood ee maalmaha shaqada ah, waxaana uu geli karaa fasaxa waalidka oo muddo dheer ah. Waxaa uu siin karaa qofka kale ee ilmaha daryeelaaya ugu badnaan 126 lacag maalmeedka waalidka ah. Arrinkaan waxaa shardi u ah in ilmuhu uusan lahayn waalid kale oo waalid ahaan loogu ansixiyay waalidka ilmaha dhalayna uusan lammaane lahayn (aan la qabin), kaasoo qaadan kara lacag maalmeedka waalidka.

Dalbo lacag maalmeedka waalidka ugu dambayn 2 bilood kahor inta uusa fasaxu bilaaban. Sida sharciga cusub uu dhigaayo, Kela-da mar dambe uma baahna in codsiga lagu lifaaqo shahaa-dada baaritaanka dambe.



Lacag maalmeedka waalidka ee qayb ahaanta ah

Waalidku waxaa sidoo kale ay samayn karaan shaqo saacado yar ah, ilmahana uu midba mar daryeelaayo. Xillgaan waxaa Kela ay bixinaysaa lacag maalmeedka waalidka ee qayb ahaanta ah, taasoo labada waalidba la siinaayo.

Haddii aad shaqayso ugu badnaan 5 saac maalinkii, waxaa adiga ku khuseeya kala bar lacag maalmeedka waalidka.

Taageerada loogu talaggalay waalidka adhabshanka soo qaata

Kela-da waxaa ay u taageereysaa waalidka ilmaha adhabshanka u soo qaatay, si la mid ah sida ay u taageerto waalidka ilmaha dhalay.

Waalidka adhabshanka soo qaatay ma qaadan karaan lacag maalmeedka uurka, laakiin waxaa ay helayaan lacag maaleemdka waalidka oo wadarta guud ay tahay 320 maalmood oo maalmaha shaqada ah.

Haddii ilmaha aad adhabshan ahaan dalka dibaddiisa uga soo qaadatay,waxaad kela-da ka dalban kartaa taageerada lacag ahaanta ah ee kharashka ku baxay adabshanka.

Taageerada guri ku haynta

Isbeddalka lagu sameeyay fasaxa waalidka waxaa uu sidoo kale saamayn ku yeelanayaa, taageerada guri ku haynta, haddii aad qaadato taageerooyinka carruurta ee ku salaysan sharciga cusub. Sida sharciga cusub uu dhigaayo waxaad bilaabi kartaa fasaxa haynta ilmaha, islamarkaana waxaad qaadan kartaa taageerada guri ku haynta, marka ilmaha dhalashadooda ay ka soo wareegtay 160 maalmood oo maalmaha shaqada ah. Markaa ilmuhu wuxuu jiraa qiyaastii da'da ah 6 bilood.



Sidoo kale waxaad heli kartaa taageerooyinka kale ee loogu talaggalay qoysaska carruurta leh

Qoysku intaa kor lagu sheegay waxaa dheer oo ay heli karaan kaalmada dhaqaale ee hooyada uurka leh la siiyo ee ah baakadda hooyannimada ama midda lacag ahaanta loo siiyo. Taageerada guri ku haynta ka sokow waxaa kaloo dheeraad ah oo qoysku ay heli karaan, waxyaabaha kale ee taageerada daryeelka carruurta ee la bixiyo fasaxa waalidka kaddib. Taageerooyinkaas waa taageero daryeel oo gaar ah, waxaa ay noqon karaan lacag qaab aan xaddidnayn ah, iyo daryeel lacageed oo qayb ahaan ah.

Sidoo kale waxaad hubisaa, inaad heli karto iyo inkale taageerooyinka kale ee la xiriira qoysaska. Taageerooyinkaas waxaa ay tusaale ahaan noqon karaan kaalmooyinka hoyga, kaalmooyinka ardayda, kaalmooyinka waajibaadka gurmadka, caymiska shaqala'aanta iyo magdhowyada la xiriira xanuunka.

Faahfaahin dheeraad waxaad ka akhrin kartaa

www.kela.fi/lapsiperheet
www.fpa.fi/barnfamiljer
www.kela.fi/family

Kela|Fpa